UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta Xaaladda # 50 – 19 Disembar, 2008

Is-beddelada Guud ee Ugu Muhiimsan

Rayidka ayaa weli ay dhibaato ka soo gaareysaa iskahorimaadyada toddobaadka dhacay ee u dhexeeya ciidamada Dowladda Federalka ee Ku-meel-gaarka ah/ciidamada Itoobiya iyo muqaawamada. 13kii Disembar, ugu yaraan 12 rayid ah ayaa ku dhintey duqeyn lagu sheegey in aan loo meel-dayin oo ay sameeyeen askarta Itoobiya oo ka fal-celinayey bambo waddada dhinaceeda ay u dhigeen muqaawamada. Sida uu sheegey Barnaamijka Dabagalka Dhaqdhaqaaqa Dadweynaha ee UNHCR, dadkaa la laayey waxa ay joogeen meel biyo laga dhaansado oo ku taalla Kaba Hirig, gobolka Shabeellaha Hoose.

13kii Disembar, ilaaliye u shaqeynayey Laanqeynta Cas ee Caalamiga ah (ICRC) ayaa toogasho lagu diley magaalada Muqdisho. Sarkaalkii ICRC iyo wadihii gaariga ee uu ilaaliyaha safar ku wada jireen, ayaa waqti kooban booliisku xireen ka dibna waa la sii daayey. ICRC waxa ay xiriir la sameysey madaxda si war looga siiyo waxa shilkan keeney.

Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobey ayaa toddobaadkan si wadajir ah isugu raacay qaraar oggolaanaya in burcad-badeedda lagula dagaallamo dhulka, badda iyo hawada Soomaaliya. In kasta oo ay ciidamo badan caalami ah oo kuwa badda ah ay joogaan biyaha Soomaaliya, haddana burcad badeeddu weli waxa ay af-duubayaan maraakiibta. In ka badan 120 markab ayaa la weerarey sanadkan, iyada oo qiyaastii 35 markabna la qafaashey.

Hay'adda IMC ayaa raadineysa hay'ad la hawlgasha oo ay ku wareejiso hawlihii ay ka haysey gobollada Baay iyo Bakool iyo waddada Afgooye. War ay 3dii Oktoobar soo saareen Al-shabaab ayaa ay ugu yeereen IMC iyo CARE in ay joojiyaan hawlgallada ay ka wadaan degaannada ay iyagu xukumaan. IMC waxa ay taageereysey xarumo caafimaad, xarumo quudin dheeri ah iyo dhowr barnaamij oo bukaan-socodka lagu daweeyo oo ay ka faa'iideysanayeen qiyaastii 30,000 oo qof bil walba.

17kii Disembar, WFP waxa ay Soomaaliya u gudbisey dhammaan cuntadii gargaarka ahayd ee uga xayirneyd saddex goobood oo xadka Kenya iyo Soomaaliya ah intii ay xuduuddu xirney bishii Nofembar.

Laba xarun idaacadeed ayaa toddobaadkan xireen maamullada islaamiyiinta. 13kii Disembar, faraca Kismaayo ee idaacadda HornAfrik ayaa loo xirey sababo aan la garaneynin. 10kii Disembar, Raadiyo Markabley ee degmada Baardheere ee gobolka Gedo ayaa la xirey. Maamulka Al-shabaab ee degaanka ayaa sheegey in idaacadda ay sii deyneysey muusik ay iyagu xaaraantinimeeyeen. Hadal ay sii daayeen Ururka Suxufiyiinta Qaranka12kii Disembar, waxa ay ku cambaareeyeen weerarka ay Hay'adda Sirdoonka Puntland ku qaaddey laba suxufi oo Boosaaso uga shaqeynayey Sharikadda Wararka ee Soomaaliya (SBC).

Waxqabadka

Ilaa 1dii Disembar, ugu yaraan 370 xaaladood oo looga shaki qabo in ay qabaan cudurka jadeecada ayaa laga soo sheegey gobolka Togdheer ee Soomaaliland. Si wax looga qabto cudurkaa dillaacay, UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa bixiyey Fitamiin 'A' dheeri ah iyo tallaalka jadeecada oo la siiyey 3,900 carruur, da'doodku ka yar tahay shan jir oo degaankaas ku nool. Xaaladaha jadeecada looga shaki qabo ee la soo sheegey ayaa si aad ah hoos uga dhacay sidii uu ahaa ilaa iyo markii uu cudurku dilaacay.

Iyada oo qayb ka ah Ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ee Soomaaliland, UNICEF iyo WHO waxa ay qorsheynayaan in ay gaaraan ugu yaraan 98,000 carruur oo ay da'doodu ka yar tahay shanta sano kuna nool gobolka togdheer marka laga bilaabo dhammaadka Disembar. Sidoo kale Soomaaliya oo dhan, UNICEF, WHO iyo la-hawlgalayaashooda ayaa tiigsan doona in ay Ololaha Maalmaha Caafimaadka Carruurta ku gaaraan carruur ka badan 1.5 milayn iyo 1 milyan oo haween ah kuna jira da'dii dhalmada. Adeegyada caafimaadka ee muhiimka ah ee ay ka mid yihiin tallaalka jadeecada iyo kan cudurka dabaysha, fitamiin 'A' dheeri ah, kiniiniga dila goryaan-ka, kiniiniga biyaha lagu sifeeyo ee *aqua-tab,* waxbarashada nadaafadda, tallaalka kojiyaha/teetanada oo haweenka la siiyo iyo baaritaan nafaqo-xumo iyo u gudbinta xarumaha caafimaadka ayaa la sameyn doonaa.

18kii Disembar, UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa bilaabay u qaybinta *Plumpy'doz* (cunto u diyaarsan in la isticmaalo oo nafaqo badan leh) carruur 9,400 ka badan oo ay da'doodu u dhaxayso lix ilaa 36 bilood oo ku nool xerooyinka Dadka Gudaha Dalka ku Barokacay ee Boosaaso, Puntland. Iyada oo qayb ka ah waxtarka, UNICEF waxa ay sidoo kale bixineynaa daaweynta caadiga ah ee nafaqo-xumada ba'an iyo sidoo kale qurub-yada nafaqada ee dheeriga ah (Vitamin A), goryaan-ka-dilid, kiniiniga *aqua tab* iyo Cusbada Fuuqcelinta. Warbixinada ugu dambeeyey ee FSAU ayaa tilmaamaya in ay ka sii dareyso xaaladda nafaqada ee xerooyinka Dadka Gudaha Dalka Ku Barokacay ee Boosaaso (waxaa hadda la soo sheegey in Nafaqo-xumada Guud ay tahay 27.9%) iyo (Nafaqo-xumada Ba'an oo ah 7.6%). Intaa waxaa dheer, in UNICEF ay badin doonto Xarumaha Daaweynta Bukaan-socodka ee xerooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Boosaaso iyada oo ku dari doonta shan kale si ay uga faa'iideystaan Dadka Gudaha Dalka Ku Barokacay iyo dadka Saboolka ah kuna nool isla magaalada Bosaso.

Wixii faahfaahin dheeri ah oo xogta Afka Ingiriisiga ah kala soo xiriir: Rita Maingi on +254 734 800 120 – maingir@un.org, Af-Soomaaliga kala soo xiriir Muna Mohamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org Website-ka: http://ochaonline.un.org/somalia